

**UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 03/04/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXIYE:-</b> ABDIFATAH SAHANE KHALIF ALI, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 01/01/1989, Sita: Naderland Pass.no., Lr. NP97PHH18	<b>LA WAKIISHE:-</b> FARAH SAHANE KHALIF, Hooyo: Bilayo Yusuf Osman, Somali ah, Ku Dhashay: Kismaayo, Sanadkii: 01/01/1986, Sita: Somali Passport, Lr. P01158948, Kana soo baxay Waxda socdalka iyo Jinsiyadaha Soomaaliya
<b>TILMAAMAHA DHULKA</b> Dhul Banaan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: <b>(Dharkenleey)</b> , Cabirka: <b>(20X10)-M</b> , Looto No: <b>562-UX (ahna nuska xiga Koofur)</b> , W.M.L: <b>(Rep. 67238/2018)</b> , Tr. 10/03/2018, Kana Soo Baxay Xaafiska Nootaayaha Muqdisho, Una Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosble	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: Jid, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

**B-** Aniga oo ah **ABDIFATAH SAHANE KHALIF ALI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkey **FARAH SAHANE KHALIF** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in dhulkaas uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in FARAH SAHANE KHALIF awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **FARAH SAHANE KHALIF**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Walaalkey ABDIFATAH SAHANE KHALIF ALI, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA**

ABDIFATAH SAHANE KHALIF ALI

*Khalif*

**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

FARAH SAHANE KHALIF

*Farah*

**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- MOHAMED DAUD GUHAD

*Mohamed*

2- MOHAMED SHARIF AHMED

*Mohamed*

**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1492/T.P.N/25, Tr. 03/04/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- ABDIFATAH SAHANE KHALIF ALI** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- FARAH SAHANE KHALIF** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayaha Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**

*Signature of Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"*









# XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

**UJEEDDO:- (HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO NUS BOOS BANAAN OO MUNCIPAAL)**  
Muqdisho maanta oo ay tariikhdu tahay 10/03/2018, Anigoo ah, Dr.Saciid Cali Cosoble, ahna Notayaha Muqdisho, Xafiiska ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa Xafiiska iigu yimid iyagoo hishiis ah, mudanayaasha hoos ku cad ina weydiistay in aan u kala qoro hishiiskooda hoos ku cad:-

- 1-)Aniga oo ah Xasno Cabdi Cali Jibriil, Waxaan Heshiiskan ku caddaynayaa aniga oo xis qaba in aan ka iibiyay kuna wareejiyay Abdifatah Sahane Khalif Ali nus booskeyga banaan oo ku yaal xamar Degmada (Dh/leey), oo aan ku milkiyay W.M.L.45034/2012, Tr,12/12/2012, kana soo baxday Nootanyo Muqdisho uuna saxiixay Dr,Saciid Cali Cosoble, nuskaas oo cabirkiisu dhan yahay (20X10-M) Lotta.Lr. (562-UX), Soohdimihiisuna kala yihiin Bari waxaa ka mara Jid, inta kalane waxaa ka xiga dhul dad. pNuska xiga koofur Lehna Nullo Oste Ku Lifaagan Warqadaan, Wuxuuna wakiilka iibsadaha nuskaas iiga iibshay lacag dhan USD. 16,000/\$.(Toban iyo Lix Kun oo Dollar oo aan lacagtaas wada qaatay). Waxaa kale oo aan caddaynayaa in nuskaas uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale iyo waxkasta oo horjoogsan kara heshiiskan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee laxiriira isla nuskaas. Wixii taariikhda sare ka bilowdana nuskaas milkiyadiisa faa'iidadiisa iyo waajibaadkiisa canshuureedba wuxuu u wareegay (Abdifatah Sahane Khalif Ali).
- 2-)Aniga oo ah Maxamed Axmed Macalow Waxaan Heshiiskan dhankayga ku caddaynayaa in aan Damiinu-aqoon ka ahay iska iibisada lagu magacaabo Xasno Cabdi Cali Jibriil.
- 3-)Aniga oo ah Farxiyo Maxamed Sh.Cali, Ahna wakiilka iibsadaha lagu magacaabo Abdifatah Sahane Khalif Ali Somali ah, Ku Dhashay Xamar, Sanadkii 1989,Kii, Degan "U,K" Hooyadiisna la yiraahdo Bilaay Sh.Yuusuf, Waxaan Heshiiskan dhankayga ku caddaynayaa in Xasno Cabdi Cali Jibriil, igu wareejiyay dhulkaan afartiisa dhinac ee kala duwan oo waxba dhimaneyn lehna sifaha ay ku soo xustay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha una saxiixay kaalintiisa Heshiiskan.

SAXIIXA ISKA IIBISADA,  
Xasno Cabdi Cali Jibriil

SAXIIXA DAMIINU-AOON,  
Maxamed Axmed Macalow,

SAXIIXA WAK. IIBSADAH,  
Farxiyo Maxamed Sh.Cali.

SAXIIXYADA MARQAATIYAASHA

1-)C/laahi Maxamed Xuseen.

2-)Cumar Maxamed Cumar.

3-)Maxamed Axmed Cabdalle

Rep. 67238/ 2018

(CADDAYNTA XAFIISKA NOOTAAYAHA)

Tr. 10/03/2018

Aniga Nootaaya Muqdisho,Dr.Saciid Cali Cosoble waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa ee 1-) Xasno Cabdi Cali Jibriil, Somali ah, Ku Dhalatay Jilib, Sanadkii 1935,Kii, Hooyadeedna la yiraahdo Xaliimo Maxamed Cabdi, lana sawiray Ahna (iska iibiso), 2-) Maxamed Axmed Macalow oo sita W.A.L.NO.13581, Ahna (Damiinu-Aqoon), 3-) Farxiyo Maxamed Sh.Cali, Muqdisho" Ahna (Wakiilka iibsadaha), iyo waliba labada nin ee Soomaaliyeed ee dhanka kale ay ka aawiyey oo ku xusan. Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadas ay ceyihiin wixii heshiiskan iiga saaxiixeen xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ku ah



NOOTAAYAHA=  
(Dr.Saciid Cali Cosoble)

*Waxaa la diwaan  
Gahiyahay Waan  
loo magaca  
Wareejiyay*

*M. M. M.  
15/3/2018*



**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 10/04/2025**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Faraax Saxane Khaliif** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1492/T.P.N/25**, Tr. **03/04/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Faraax Saxane Khaliif
<b>La Wakiishay</b>	Dhul
<b>Cabirka</b>	20X10-M
<b>Ku Yaallo</b>	Muqdisho, Degmada Dharkeynley
<b>Lotto Lambar</b>	562-UX
<b>W.M.L</b>	Rep. 67238/2018, Tr. 10/03/2018 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	03/04/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **Faraax Saxane Khaliif**, Leh Tel No. **0625593035**, Degan **Dharkeeley** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Faraax Saxane Khaliif**

*Faraax*